



**DIB U CELIN DEGDEG AH:** Abbott ayaa soo saartay amarka soo celinta caano **Booraha Similac** ay samayso.

- Caano booraha Similac - Advance, Total Comfort, Sensitive, iyo Spit Up
- Caano booraha Alimentum

**Caano booraha ilmaha ee lagasoo celiyay suuqyada:**

- Lambarada boosaska oo ka bilaawda 22-37; **iy**
- K8, SH, ama Z2 (arag sawirka); **iy**
- Taariikhda dhicitaanku waa Abriil 2022 ama kadib.

Ka fiiri lambarada nooca caanahaaga barta [similacrecall.com](http://similacrecall.com).

- Haddii dib u celin la amray, HA siinin cunugaaga caanaha Booraha.
- Ku calaamadee dhammaan qasacyada dib u celintooda la amray "Do Not Use (Ha Isticmaalin)". Arag faahfaahinta ku aadan sida la iskugu badasho ama loo badalo caanaha ilmaha ee hoos ku qoran.

**Xulashooyinka Caanaha Ilmaha ee WIC:**

- [Dookhyada Ku meel Gaarka ah ee Caanaha Ilmaha – Buug Tilmaamo oo Sawiro leh \(3/10/22\) \(PDF\)](#)

**Sida nooc kale loogu badasho caanaha ilmaha ee dib u celintooda la amray ee guriga kuu yaala:**

1. **Dukaannada** - Iskuday inaad caanaha ilmaha ku celiso dukaanka
  - Dukaan kasta waxaa gaar ah u ah dookhyada ay ku siin karaan.
  - Dukaannada qaarkood ayaa kaa qaban kara caanaha ilmaha ee dib loo celinaayo kuna siinaaya nooc kale oo badal ah, caawimaada dukaanka, ama lacag celin. Haddii dookhaan jiro, waxaad u adeegsan kartaa kaarka ama lacagta lagu ceshay inaad ku iibsato caanaha ilmaha ee kasta ood rabto.

- Haddii uusan dukaanku kuu badalayn caanaha ilmaha eeg lambarka 2 aad iyo 3 aad ee hoose.

**2. Shirkada Caanaha Qasacada ee Similac (Abbott) -** Ku soo celi caanaha ilmaha ee la amray soo celintooda Abbott.

Qoysaska ayaa caanaha ilmaha ee gurigooda yaala ku celin kara Abbott. Si aad talaabadaan u qaado:

- Booqo [www.SimilacRecall.com](http://www.SimilacRecall.com) ama wac [1-800-986-8540](tel:1-800-986-8540);
- Markaad gasho webseedka, aad salka hoose ee bogga kadibna guji “Check Lot Number (Akhri lambarka Aqoonsiga)”;
- Geli lambarka ku yaala salka hoose ee qasaca caanaha aad celinayso;
- Haddii ay tahay caano ilmood oo soo celintooda la amray, foomka liiska hoose ayaa sheegaaya lambarka caanaha uu qayb ka yahay caanaha la celinaayo;
- Buuxi oo dir foomka;
- Fariin ayaa soo boodaysa dhahaysa, “Abbott received the return request and to watch your email for a link to get the unique return label (Abbott waxaa soo gaaray codsiga caano celinta iyo inaad iimeelkaaga ka eegto lifaaq si aad u hesho astaanta gaarka ah ee codsiga)”;
- Qoysasku waa inay baakad gareeyaan caanaha ilmaha oo la gelinaayo bokis, ku qoraan astaanta, kadibna u qaadaan sida loogu sheegay iimeelka boostada oo u gaynaysa Abbott;
- Waxay qaadanaasaa illaa 4 asbuuc in qoysasku helaan jeega. Qoysaska wax xadidaada laguma saaraayo waxa ay ku qabanayaan lacagta.

**Sida loo badalo ama mid kale logu badasho gunnooyinka caanaha ilmaha ee WIC:**

**1. Xarunta WIC -** Wac Xaruntaada WIC si aad gunnooyinka caanaha ilmaha ugu badelato ama kuwo kale ama iskaga badasho caanaha ilmaha.

- Fiiri nooca caanaha ilmaha ee Women, Infants, and Children (WIC, Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta) ee laga helo dukaanadaada;
- Wac Xaruntaada WIC si aad u badelato ama iskaga badasho gunnooyinka caanaha markaad rabto;

**2. Xafiiska heer gobal ee WIC -** haddii aadan heli karin xaruntaada, wac tan gobalka ood ka helayso 1-800-841-1410 Isniinta ilaa Jimcaha 8am ilaa 5pm.

**Ilaha:**

- Barnaamijka cuntada aasaasiga ah (Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah)) iyo kaydada cuntada - [webseedka ParentHelp123](#) ama nagasoo wac 1-800-322-2588.

Hay'addaan waa adeeg bixiye ku shaqeeya fursad loo wada siman yahay.

Washington WIC cidna ma midab takoorto.

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-841-1410. Macaamiisha dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimeel udir [WIC@doh.wa.gov](mailto:WIC@doh.wa.gov).

DOH 961-1265 March 2022 Somali